

Shaacinta Warar Degdeg ah: Isniin, Luulyo 26, 2021 La xariir: Xafiiska Wararka, 617-635-4461

BROGRAAMKA TIJAAMBINTA OO LAGA BIXIYO TIGIDHO LACAG LA'AAN AH OO LAGU RAACO WADDADA 28 MUDDO SADDAX BIL HORAANTA QABOBAHAAN

Dhamaan dadka raaca Baska MBTA Waddada 28 waxay awood u yeelan doonaan in ay koraan iyo in ay lacag la'aan ku raacaan baska laga bilaabo Agoosto 29 ilaa Nofeembar 29, 2021.

BOSTON - Luulyo 26, 2021 - Duqa Magaalada Kim Janey wuxuu ku dhawaaqay in Magaalada Boston ay bilaabi doonto tijaabinta tigidhka lacag la'aanta ee lagu raaco MBTA Jidka 28 laga bilaabo Agoosto 29 muddo saddax bil ilaa Nofeembar 29. Dadka raaca waddada 28 waxay awood u yeelan doonaan in ay basaska ka raacaan dhamaan albaabada iyagoo aan u baahanin in ay bixiyaan kharashka tigidhka.

Jidka 28 waa mid ka mid ah waddooyinka baska MBTA ee aad loo raaco, ha ahaato ka hor iyo inta uu socdo cudurka COVID-19, qiyaas ahaan waxaa raaca 12,880 maalin kasta oo la shaqeeyo. Guud ahaan, raacidda waa adag tahay maalinimada marka loo fiiriyo waddooyinka kale ee muujiya in ay hoos jirto raacidda waqtiga aysan badneen dadka raaca. Waddada waxay ka bilaabataa Mattapan Square ilaa Ruggles Station iyadoo soo marta Nubian Square iyo Roxbury Crossing. Waa isku xerid muhiim ah oo isku xera dadka daggan Mattapan, Roxbury iyo Dorchester iyo baska ugu muhiimsan shabakada MBTA, treenka iyo gaadiidka magaalada. Xaafadaha waxay hooy u yahiin qoysas boqolkiiba qeyb badan dakhligooda ku bixiya gaadiidka marka loo fiiriyo inta badan xaafadaha kale.

"Sida qof ku tiirsan, sida inta badan Boston, adeegga MBTA ee joogtada ah iyo leysku haleyn karo, Aniga waxaan qofka ugu horeeyo oo ogsoon sida Jidka 28 u yahay dhabaha dhaqaalaha ee isku xera Mattapan, Roxbury, iyo Dorchester. Brograamka tijaabinta Tigidhka Lacaga La'aanta Waddada 28 wuxuu muujiyaa ballanka Magaalada qaaday in gaadiidka laga dhigo mid ay heli karaan dadka daggan magaalada iyo dadka u socdo horay iyo gadaal," ayuu yiri/tiri duqa magaalada Mayor Janey. "Waxaan u mahad celinaa iskaashiga ka dhexeeyo MBTA iyo Waaxda Gaadiidka Boston, taasoo suurto gelisay dadaalkaan.

"Waxaan soo dhaweyneynaa fursadda in aan tijaabadaan sharaako kula noqono Magaalada Boston," ayuu yiri Steve Poftak oo ah Maamulaha Guud MBTA. "Waxaan rajeyneynaa in aan qiimeyno iyo in aan in badan ka ogaano saamaynta ay ku leedahay raacidda iyo shabakada gaadiidka."

Ujeedada tijaabinta, taasoo Magaalada Boston ka heshay \$500,000, waxay tahay in manafaacaa toos ah la siiyo qaar ka mid ah bulshadaha Boston ay sida adag u saameysay diillaca cudurka COVID-19. In ka badan labo meel marka laga soo qaado saddax meel dadka raaca Waddada 28 waxaa lagu sifeyaa in ay yahiin dad dakhligooda hooseeyo sida waafaqsan wareysiga ay dhawaanahaan qaaday MBTA ee ku baahsan siistemka. Tigidhada lacag la'aanta waxay yareyn doonaan culuska maaliyadda ee saaran rakaabka waqti ay dhibaataada dhaqaalaha ay taariikh ahaan ugu sareeyso, halka ka-raacidda dhamaan albaabada dadajin doonto raacidda iyo waqtiyada safarka jid badanaa ka daaha jadwalka. Wadajir ahaan, tani waxay dadka raaca Waddada 28 si fudud ugu kaalmeyn kartaa in ay ku soo biiraan dib u furidda magaalada iyo dadaalka dib u soo nooleynta.

Waaxda Gaadiidka Boston (Boston Transportation Department) iyo MBTA waxay si wadajir ah u maamuli doonaan brograamka tijaabada, iyagoo sameeya isku celcelinta hadba sida loogu baahdo. Si loo qiimeeyo tijaabinta, wakaaladaha waxay soo aruurin doonaan xogta hawlaha iyo waxay qaadi

doonaan wareysiyada. Cabbirada ugu muhiimsan ee la xariira ujeedooyinka dadaalka waxaa ka mid ah saamaynta ay ku leedahay safarka, isku haleynta waqtiga, waayaha rakaabka, iyo raacidda.

Tijaabada waxay kaloo raacsan tahay dadaalka Magaalada Boston ugu jirto horumarinta adeegga gaadiidka mara Blue Hill Avenue, Warren Street yo Malcolm Boulevard. Wakaaladaha Magaalada waxay la shaqeyaan kooxaha bulshada deegaanka iyo milkiileyasha in ay jidadkaan ka dhigaan kuwo ammaan ah si dadka lugeeyo ay si nabad leh uga gudbaan waddada, hagaajinta socodka baabuurta sida basaska, iyo shiddada ka ilaaliya dadka ku socda baskiilada. Horaantii Luulyo, Magaalada waxay kaloo soo gudbisay arji gaara \$25 malyan oo la rabo in federaalka uu ku maalgeliyo Blue Hill Avenue iyagoo kaashanaayo taageerada MBTA.

Tijaabinta (Pilot) waxay qeyb ka tahay qorshe balaaran oo kaalmo ka geysato soo celinta dhaqaalaha kana mid ah brograam iminka la dhamaystiray in tigidhada lacag la'aanta (free pasees) ee MBTA iyo Bluebikes loo qeybiyo shaqaalaha ganacsatada yaryar ee ka shaqeysta Waddooyinka Waaweyn ee Magaalada iyo brograamka cuntada dibadda.

Si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan Brograamka Tijaabinta Waddada 28 (Route 28 Pilot Program), booqo www.boston.gov/28bus iyo mbta.com/28pilot.

###